

Wargeyska Mountain View

Diseembar 9, 2015

Talaado, Diseembar 8.....Shirka Waalidiinta iyo Agaasimayaasha 8:15 a.m.

Jimco, Diseembar 18.....Bandhigga Musiikada Fasaxa Waalidiinta, 8:30 a.m.

Isniin, Diseembar 21-Janaayo 3.....Ma Jiro Dugsi, Nasashada Qaboobaha

Isniin, Janaayo 4.....Resumeeyada Dugsiga

Fariinta Agaasimaha

Waxaan na soo gallay qaboobaha, iyo taxadiga la socdo. Dhamaan waalidiinta iyo ardayda waxay u baahan yahiin in ay la socdaan in aan, sida caadada ah, u bixi doono dibadda waqtiga nasashada inta lagu dhex jiro qaboobaha. Marmar maalmaha qaboobaha aad ayay u qabooban yahiin, waa qoyaan, sidaas darteed waxaan u baahanahay in ardayda soo qaataan labbiska ku habboon sida koodad, gacan gashad, iyo kabaha boodka, si aan u qaadano nasashada madaxa iyo jimicsiga jirka anaga oo iska ilaalina qabooowga. Dhowr arday ayaa noo sheegay in ay u baahan yahiin in ay ku haraan gudaha maxaa yeelay waxaa jiray qabooow. Qof kasta wuxuu tagi doonaa dibadda haddii aysan qoraal ka haysanin takhtarka in ay jirto baahi caafimaad in lagu sugnaado gudaha.

Waxaa jira labo xaalad oo nagu hayn doono gudaha waqtiyada nasashada. Midda kowaad, waa marka cimilada darran tahay, midda labaad waa marka tayada hawada aad u liidato.

Cimilada nagu qasbi doonto in aan ku harno gudaha waa marka lala kulmo xaaladaha roobka culus ama barafka ama marka heerkulka ka hoos maro 20 digrii Fahrenheit. Hase ahatee, go'aanka ku saabsan roobka ama barafka culus, waxaa gaara maamuleyaasha.

Waxaa jira habab ku saleysan saynis oo lagu cabbiro waxyabaha ku jira hawada. Utah Department of Health (Waaxda Caafimaadka Utah) iyo Utah Department of Air Quality (Waaxda Tayada Hawada Utah) waxay na siyeen tilmaamo ku saabsan qaadashada nasashada gudaha. Marka waxyabaha ku jira hawada u dhexeyaaan 35.5 iyo 55.4 ug/m, ardayda dareenka badan (kuwa qaba neefta, nabarada lagu magacaabo "cystic fibrosis", xaaladaha sambabaha ee soo noqnoqda, cudurka wadnaha ee lagu dhasho, siistemyada difaaca halleyasan, ama dhibatooyinka kale ee la xariira neefta) waxay ku hari doonaan gudaha, inta u dhexeyso 55.5 iyo 90 ug/m, ardayda dareenka badan iyo ardayda qabta calaamadaha neefta (qufaca, jiididda neefta, neef yarida, iyo cariiriga xabadka) waxay ku hari doonaan gudaha, iyo marka cabbirkka ka sareeyo 90 ug/m dhamaan ardayda waxay ku hari doonaan gudaha.

Waalidiinta iyo Agaasimayaasha

Agaasimayaasha waxay jecel yahiin in ay kula kulmaan, kula qeybsadaan waxa ku cusub Mountain View, iyo in ay ka jawaabaan su'aalaha laga yaabo in aad qabtid. Wada hadalkena xiga ee loo qabto Waalidiinta iyo Agaasimayaasha waxaa lagu qaban doonaa Xarunta Waxbarashada Bulshada (Community Learning Center) maaalinta Talaadada, Janaayo 5, marka ay tahay 8:15 a.m. Dhowrkii todobaad ee la soo dhaafay waxay ahayd wax wanaagsan in aan halkaas ku aragno dhowraabeyaa. Waxaan rajeyneynaa in aan halkaas kugu aragno.

Bandhigga Muusikada Fasaxa loogu talogallay Waalidinta

Bishii Diseembar 28, dhamaan waalidiinta iyo xubnaha qoyska waxaa lagu casumay in ay arkaan caruurtooda oo ku hawlan heesaha nagu kaalmeeyo in aan xusno xilliga fasaxa. Dhamaan darajooyinka waxay soo mari doonaan hortaada si ay kuugu heesaan adiga! Bandhigga wuxuu bilaaban doonaa 8:30, sidaas darteed fadlan fadhiista kuraasta qolka bandhigga ka hor inta aan la gaarin waqtigaas.